Qorshaha Kaalmada Luqadda
Barnaamijka Tri-County Action Program, Inc.

Dhaqan-gelaya
Luulyo 30, 2018

Ujeeddo

Ujeedada Qorshahan Taageerida Luqadda (oo aan odhanayno "qorshaha ") ayaa ah in la waafaqo shuruudaha Maamulka Gaadiidka ee Federaalka (FTA) si loogu hogaansamo Qodobka VI ee Sharciga Xuquuqda Dadweynaha ee 1964(Civil Rights Act of 1964), kaasoo mamnuucaya takoorka ku salaysan jinsi, midab, ama qaranka asal ahaaneed. Iyada oo ah hay'ad hesha lacagaha FTA ayaa nidaamka gaadiidkani uu ballan qaaday in uu qaado tallaabooyin macquul ah si uu u bixiyo jid macquul ah oo lagu helo karo adeegyada gaadiidka oo loogu talagalay dadka aan ugu hadlin Ingiriisiga sida afkooda hooyo iyo kuwa ay xaddidan tahay awoodooda akhriska, hadalka, qoraalka iyo fahamka Ingiriisigu. FTA waxay u aqoonsantahay dadkaas dadka uu Af Ingiriisigoodu koobanyahay (Limited English Proficient LEP).

Dhamaystirka qorshahan loogu talagalay dadka Af Ingiriisigoodu kooban yahay waxay waafaqaysaa shuruudaha FTA Circular 4702.1B Shuruudaha Qodobka VI iyo Shuruudaha dadka hela gaadiidka Maamulka Gaadiidka ee Federaalka.

Daabacaadda ay soo saartay Xafiiska Xuquuqda Dadweynaha ee FTAga US DOT ee "Fulinta Qorshaha Xeerka Wasaaradda Gaadiidka ee Ku Saabsan Mas'uuliyadaha ka Saaran hay'adaha La siiyo (lacagaha) ee Dadka Af Ingiriisigoodu kooban yahay - oo ah Buug-gacmeed loogu talagalay Bixiyeyaasha Gaadiidka Dadweynaha," ku taariikhaysan 13-ka Abril 2007, ayaa loo isticmaalay diyaarinta qorshahan, iyo sidoo kale Barnaamijka Kaalmada Gaadiidka Qaranka Dhulka Miyiga (RTAP), Adeegyada Webinar-ka ee RTAP 101: Shuruudaha Title VI laga bilaabo Luulyo 29, 2014.

Qorshaha Barnaamijka Waxqabadka Tri-County Action Program, Inc., Tri-CAP, wuxuu ka kooban yahay:

A. Qiimaynta baahida ee ku salaysan falanqaynta afar-qodob
B. Qiyaasaha kaalmada luqadda
C. Qorshaha tababarka shaqaalaha
D. Hababka lagu ogeysiinayo dadka uu Af Ingiriisigoodu kooban yahay wixii ku saabsan caawimada luqadda ee la heli karo
E. Hababka lagu kormeerayo, qiimeynta iyo cusbooneysiinta qorshaha

A. Qiimaynta Baahida dadka uu Af Ingiriisigoodu kooban yahay - Falanqaynta Afarta qodob

Qodobka 1. Tirada ama saamiga dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay ee nawaaxiga/aagga adeegeena ee laga yaabo in ay adeega isticmaalaan ama ay badan tahay in ay la kulmaan barnaamijka gaadiidka, hawl, ama adeeg.

Waxaanu qiimeynay macluumaadka soo socda ee ku saabsan dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay si loo go'aamiyo tirada ama qaybta dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay ee isticmaali kara ama doonaya inay isticmaalaan adeegyadayada hay'adda:

- 2014 DataUSA, oo isticmaalaysa ilaha macluumaadka ee Afti American Community Survey (ACS) wuxuu muujinayaa (tarjumayaa) in marka la isku daro, afarta luuqadood ee ka jira afarta degmo ee Tri-CAP ee adeegeena gaadiidka oo ka mid ah degmooyinka Benton, Morrison, Sherburne iyo Stearns, iyagoo sida ay u kala badan yihiin u kala horeeya ay yihiin Isbaanish, Luuqadaha Afrika, Jarmal, iyo Hmong.
- Natiijooyinka daraasadda ka soo baxday Hay'adda Qiimeynta Baahiyaha Bulshadu ay samaysay 2016kii (Community Needs Assessment) (oo laga heli karo website-ka Tri-CAP.org)
- Macluumaadka ka yimaada ururrada maxaliga ah (diinta, sharciga, adeega bulshada, iwm.) oo ku saabsan dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay ee aagagga adeegeena.
- Warbixinnada ka yimaada darawallada, kala-dirayaasha iyo shaqaalaha barnaamijka Tri-CAP ee ku saabsan xiriirka lala yeesho dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay.

Sida laga soo xigtay xogta laga helay DataUSA taas oo isticmaalaysa American Aftida Bulshada Maraykanka (Community Survey) ee 2014:

1) Tirada guud ee dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay ee aagga adeegeenu waa 17,775.
2) Wadarta guud ee dadka xaqa u leh adeegeena ee nawaaxiga adeegeena waa 315,179.
3) Saamiga dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay ee wadarta guud ee dadka adeega xaqa u leh waa 5.6%

Qiimeynta Baahiyaha Bulshada Aftida Macaamiisha ee Tri-CAP samaysay 2016 natiijadu waxay noqotay in 5% dadka jawaabaha bixiyay (23 ka mid ah 441) ayna sheeganin in Ingiriisigu yahay luuqadooda koowaad (bogga 7 Sahaminta Macaamiisha).

Natiijooyinka ka soo baxay Aftida Bixiyeyaasha ee Qiimeynta Baahiyaha Bulshada Tri-CAP samaysay 2016 (bogga 28-aad ee Sahanka Bixiyaha), marka la waydiiyey "Maxay tahay baahida ugu weyn ee aad ku aragtid qoysaska aad la shaqeysid, hal jawaab celiye ayaa qoray, "Dhibaatooyinka isku-xirka adeegyada ama barnaamijyada ay ugu wacan tahay la'aanta luqadda ama caqabadaha sida ay ah 10 ka jawaabood ee bixiyeyaasha.

Qodobka 2. Inta goor ee dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay lasoo xiriiraan barnaamijyadayada gaadiidka, waxqabadyada, ama adeegyada.

Shaqaalaha Gaadiidka Tri-CAP waxay xiriir maalinle ah la leeyihiin macaamiisha uu af Ingiriisigoodu kooban yahay. Waxaan gaadiid ku qaadnaa caruur Isbaanish ku hadla xanaanada (pre-school) iyo iskuulada barnaamijka sanadka oo dhan ee agagaarka Rockville, Cold Spring, Melrose, iyo Sauk Centre. Rakaabka ku hadla

Isbaanishku waxay u adeegsadaan adeegyadeena Melrose baahida caafimaad iyo dukaameysiga. Waxaan si joogto ah u qaadnaa rakaabka ku hadla afafka afrikaanka ee Galbeedka degmada Stearns. Safaradan joogtada ah waxaa dheer, waxaan si joogto ah u helnaa su'aalo telefoon oo ku saabsan baahida gaadiid kale. Lixdii bilood ee la soo dhaafay, kala-dirayaasha (dispatcher) Tri-CAP waxay adeegsadeen khadka luqadda 9 jeer oo caawimaad Isbaanish ah iyo 12 jeer oo Soomaali ah.

Gabagabadii laga soo qaatay baadhitaanka macluumaadkan ee ku saabsan dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay ee raadinaya adeegyada gaadiidka dadweynaha waxay tahay in aan xoojinney awooda aan u leenahay in aan xidhiidhino dadkeena uu af Ingiriisigoodu kooban yahay iyada oo aan la shaqaynayno hay'adaha aan wada shaqayno iyo iyada oo loo marayo kordhinta guud ahaan hay'adda iyo helitaanka macluumaadka barnaamijyada luuqado badan ah. Waxaa jira shaqo badan oo ah in laga qabto dhinacan sidaa darteed waxaan sii wadi doonaa inaan sii wadno xiriirka cilaaqaadka, ku lug lahaanshaha horumarinta tiknoolajiyada, iyo ka jawaabida baahiyaha soo baxaya.

Qodobka 3. Dabeecadda iyo muhiimada barnaamijyada, waxqabadyada, ama adeegyada loo fidiyay dadweynaha uu af Ingiriisigoodu kooban yahay.

Tri-CAP waxay u tixgelin siinaysaa gaadiidku inuu noqdo adeeg muhiim ah oo aasaasi u ah dad badan oo ku nool aagagga adeega. Gaadiidku sidoo kale waa qodob ka mid ah sinnaan. Dad badan oo ka mid ah dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay waxay ku tiirsan yihiin adeegyadayada gaadiidka si ay ugu tagaan shaqada, iskuulka, caafimaadka iyo dukaameysiga.

Qodobka 4. Khayraadka la heli karo iyo kharashka guud ee bixinta kaalmada luqadda.

Tri-CAP waxay isticmaashaa suuqgeynta iyo isgaarsiinta si ay luuqadooda ugula xiriiraan dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay. Miisaaniyada hadda jirta ee suuqgeynta ama luuqadooda kula xiriirka dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay dhanka wixii ku saabsan adeegyada gaadiidka ee ay heli karaan waa $ 1,000. Adeegyada xirfadahan waxaa ka mid ah suuqgeynta, turjumaanka iyo adeega turjumaadda qoraalka, naqshadeynta, samaynta qoraallada casriga (brochure template creation), wargeysyada jaraa'idka, xayaysiisyada raadiyaha, iyo qaabeynta website-ka.

B. Tallaabooyinka Caawimada Luqadda

Waxaa jira dhowr tallaabooyin caawimo oo luuqado badan ah oo la heli karo laguna isticmaalay Gaadiidka Tri-CAP oo loogu talagalay isgaadhsiinta iyo helitaanka. Kuwaas waxaa ka mid ah:

- ✓ U turjumaada dukumiintiyada muhiimka ah Isbaanish iyo Soomaali
- ✓ Isku duwidda helitaanka turjumaanka afka
- ✓ La xidhiidhka kooxaha uu af Ingiriisigoodu kooban yahay ee ku saabsan dhanka adeegyada gaadiidka

- ✓ Ku soo dhejinta ogeysiisyada luqadaha ku haboon ee ku wargelinaya dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay adeegyada loo hayo
- ✓ Turjumaada khadka taleefanka luqadda
- ✓ Shaqaaleynta shaqaale laba luqadoodle ah marka ay suurtogal tahay
- ✓ Luuqado kale u tarjumaadda website-ka
- ✓ Kooxda Xirfadaha Dhaqanka

Qofna looma diidi karo helitaanka barnaamijyada Tri-CAP ama macluumaadka barnaamijka sababta oo ah isaga/iyada oo aan ku hadlin ama akhrin karin Ingiriisi ama leh xirfado Ingiriisi oo xaddidan. Tri-CAP waxay bixinaysaa adeegyada kaalmada luqadda marka loo baahdo oo ay siinaysaa macaamiisha uu af Ingiriisigoodu kooban yahay si ay u siiyaan barnaamijyo iyo adeegyo muhiim ah oo loo hubiyo jiritaanka wada-xiriir sax ah oo u dhexeeya macaamiisha iyo shaqaalaha Tri-CAP. Macaamiisha waxaa la siin doonaa adeegyada kaalmada luqadda iyada oo aan wax kharash ah ku joogin iyaga si wakhtiga ku haboon saacadaha ganacsiga.

Xeerarka muhiim ka ah ee gaadiidka Tri-CAP iyo hagaha waa la turjumay waxaana laga heli karaa website-ka hay'adda ama daabacaadda. Qoraallada guud ee Wakaaladda ayaa la turjumay waxaana la heli karaa iyaga oo daabacan.

Tri-CAP waxay isticmaashaa adeega turjumaan xirfad leh si loo hubiyo in turjumaanka uu awood u leeyahay inuu bixiyo adeegyada turjumaanka. Turjumaanku waa in uu aad u yaqaana Ingiriisiga iyo afka la rabo labadaba oo uu awoodo in uu u kala gudbiyo macluumaadka labada luuqadood si sax ah. Haddii turjumaan loo baahdo luqad aan joogto ahaan halkan laga isticmaalin, ama aan la helin si waqtiga ku haboon, shaqaalaha Tri-CAP waxay ku wargalinayaan Agaasimaha Barnaamijka si loo sameeyo qorshayn habboon.

Shaqaalaha Tri-CAP waxay caawimaad u fidiyaan macaamiisha leh aqoon Ingiriisi xaddidan oo aan akhrin luuqadooda hooyo si la mid ah sida aan u caawin lahayn macaamiisha luqadda Ingiriisiga ku hadla ee aan akhrin Ingiriisiga.

Macaamiisha aan Ingiriisiga ku hadlin waxaa lagu ogaysiin doonaa wixii ku saabsan kaalmada luqadda ee la heli karo iyada oo loo marayo isticmaalka ogaysiiska waraaqaha, macluumaadka website-ka iyo habab kale sida ku habboon.

Shaqaaluhu waxay isticmaalaan Khadka Luqadda si ay u siiyaan caawimaad turjumaan taleefanka ah.

Tri-CAP wuxuu qortaa shaqaalaha laba luqadoodlaha ah marka ay suurtogal tahay iyadoo la dhiirigelinayo musharaxiinta laba-luqadoodlaha ah in ay codsadaan boosaska joogtada ah. Waxaan la shaqaynaa hawl-wadeenada wacyigalin kuwaas oo u adeega beelaha laga tirada badan yahay dhanka xayeysiinta boosaska furan oo ay ku jiraan in xirfadlaha laba-luuqadoodlaha oo la doorbidayo dhamaan boosaska macaamiisheena siiya adeeg toos ah. Intaas waxaa dheer, markaan la shaqaynayo hay'adaha shaqaalaha ku meel gaadhka ah, doorbididda waxaa la siiyaa musharaxiinta laba-luqadoodlaha ah.

Website-ka Tri-CAP waxaa loo naqshadeeyey hab isticmaalaya calaamado iyo xarfaha oo isku ladhan si ay calaamado iyo qoraal ugu muujiso ujeedada. Xarunta

website-ka waxaa loogu talagalay in lagu haboonaysiiyo isticmaalka muraayada weyneysa shaashada iyo isticmaalka hadalka kombiitarka, si kor loogu qaado in ay isticmaali karaan dadka aragoodu daciifka yahay. Website-ka Tri-CAP ayaa sidoo kale isticmaala adeega u tarjumaadda website-ka 105 af oo kala duwan isla markiiba marka aad gujiso badhan.

Sababtoo ah luqadda iyo dhaqanka ayaa si aad ah isugu xiran, sanadka 2017 Tri-CAP waxay abuurtay Koox Xirfad Dhaqameed oo kala duwan oo xubnahoodu ka shaqeeyaan sidii loo horumarin lahaa awoodda hay'adda ee la shaqaynta dadyowga kala duwan. Hadafka oo ah bixinta jawi soo dhaweyn leh iyo hagaajinta barnaamijyada iyo in dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay isticmaalaan dhammaan barnaamijyada, Guddiga Tri-CAP ayaa ansixiyey Lixda Caqiido ee Kooxda Xirfada Dhaqanku (Six Tenets of Competence Cultural) in ay noqoto mabaadii'da hay'adda ee dhanka cilaaqaadka. Lixda caqiido waa:

- Bixinta fursado waxbarasho iyo tababar iyada oo rajadu tahay shaqaaluhu in ay xirfad ahaan horumaraan
- Horumarinta isku-kalsoonaanta macaamiishayada ee sharfidda shaqsiga
- U hogaansanaanta ixtiraamidda kala duwanaanshaha ka dhex jira bulshadeena
- Bixinta adeegyo si sinnaan ah oo ay bixiso Tri-CAP
- Raadin iyo soo dhaweyn macaamiisha kala duwan iyo musharaxiinta doonaya fursadaha hay'adda
- Udoodista iyo aqoonsashada dhaqanka qofka.

C. Tababarka Shaqaalaha

Si loo xaqiijiyo si sax ah u fulinta qorshe hawleedkan, Hay'addu waxay qorsheyneysaa tababarka sanadlaha ah iyo qorshaha la qabadsiinta shaqaalaha cusub oo ay ka mid yihiin:

- Qorshaha Kaalmada Luqadda ee nidaamka gaadiidka
- Walxaha loo daabacay dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay
- Sida loo maareeyo codsiyada afka ah ee adeega luqad shisheeye ah
- Waajibaadka in lagu ogeysiiyo wixii ka mid ah baahida dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay ee aan la daboolin.

Waxaa intaa dheer, fursado loogu talagalay Tababarka Xirfadaha Dhaqanka ah oo loo qorsheeyey oo loo heli karo dhammaan shaqaalaha Tri-CAP oo ay diyaarisay Kooxda Xirfadaha Dhaqanku. Macluumaadka xaaladaha/munaasabadaha hadda ah, jadwalka gudaha ah oo dhacdooyinka bulshada ee hadda, iyo baadhitaanada gudaha ah ee hay'adaha ayaa lagu hawlan yahay sidii loo kordhin lahaa kartida dhaqameed ee shaqaalaha Tri-CAP iyada oo ujeedadeedu tahay abuurista meel lagu soo dhaweeyo dadyaw kala duwan.

D. Ogaysiiska dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay ee ku Saabsan Gargaarka Luuqadeed ee La heli Karo

Hay'adeenu waxay qorsheyneysaa inay dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay luuqadooda ku wargeliso wixii ku saabsan kaalmada luuqadda ee ay heli karaan iyaga oo aan wax kharash ah isticmaalin iyada oo la raacayo hababka soo socda:

- U diritaanka macluumaadka ururrada maxaliga ah ee la shaqeeya dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay
- Ku helitaanka boga website-ka oo luuqado badan
- Miisaska macluumaadka ee dhacdooyinka/bandhigyada deegaanka

E. Kormeer Sanadle ah, Qiimeynta iyo Dib u-Cusbooneysiinta Qorshaha

Nidaamka gaadiidka ayaa dib u eegi doona qorshahan inta lagu jiro dib u eegista sanadlaha ah ee Waaxda Gaadiidka ee Minnesota, MN/DOT, iyo maamulaha mashruuca socdaalka iyada oo la samaynayo:

- Qiimaynta waxtarkeeda,
- Qiimaynta ku filnaanta tababarka shaqaalaha iyo miisaaniyada gargaarka luuqadda,
- Dib u eegista ilaha hadda jira ee gargaarka si loo hubiyo helitaanka sii socoshada, iyo
- Dib u eegida cabashooyinka ka yimaada dadka uu af Ingiriisigoodu kooban yahay ama baahidooda ee nasoo gaadhay sanadkii hore.

F. Qorshaha Baahinta

Qorshahan Kaalmada Luuqadeed waxaa laga heli karaa boggayaga website-ka www.tricap.org

Qorshahan sidoo kale waxaa lagu heli karaa bilaash ahaan Ingiriisi, Isbaanish, iyo Soomaali marka lagu codsado telefoon, fakis, iyo boostada ama shakhsi ahaan.

Haddii lagu codsado luqad kale, oo ay suurtagal tahay in la turjumo, macluumaadka ayaa la bixin doonaa iyada oo aan wax kharash ah u lahayn codsadaha.

G. Macluumaadka xiriirka

Su'aalo ama faallooyin ku saabsan qorshahan waxaa loo gudbin karaa:

Lori Schultz
Agaasimaha Fulinta
PO Box 683
Waite Park, MN 56387

320.251.1612
Fakis: 320.255.9518
email: general@tricap.org